**Xeer-Sharci lamba. 1 ee 16 Febarayo 1966**

**Wakaladda Horumarinta Beeraha**

## MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay qod. 63 ee Dastuurka;

Kabid markii la garawsaday baahidda deg-degta ah ee loo qabo in la soo saaro xeer lkadib markii ay dhamaatay howlgalka sharci lamba. 22 ee 20 Nofember ee lagu dhisaay Wakaaladda Horumarinta Beeraha, kaas oo qasbaaya in xeerar cusub ee la xiriira arrintaani iyo qorshooshinka Wakaaladda ka hor intii uusan xilliga "GUUGA" ah;

Kadib markii la tixgeliyey soo jeedinta Wasiirka Beeraha iyo Xanaanada Xoolaha;

Kadib markii la dhegeysta soo jeedinta Golaha Wasiiradaha.

## WAXAA LA SOO SAARAY

## Cutubka 1aad

Dhisdda, Howlaha iyo Awoodaha Hey'adda Horumarinta Beeraha

### Qod. 1
### Dhismaha Waaladda Horumarinta Beeraha

Waxaa la dhisay Hey'adda Horumarinta Beeraha:

1. Hey'adda Horumarinta Beeraha;
2. Hey'adda Horumarinta Beeraha waa Hey'adda Dowli ah ah oo awood qeynuun dowli ah iyo awod madax banin leh;
3. Saldhigga Hey'addu waa Muqdishu, wuxu ku yeelan karta faracyo meelo kale haddii loo baahdo.

### Qod.2
### Ujeedoyinka Hey'adda Horumarinta Beeraha

Wakaaldda Horumarinta Beeraha waxaa ay fulin doontaa ujeedoyinkaan hoos ku tixan:

A) Horuarinta beeraha, sida kordhinta dalaga ee qeybaha la beero iyo fidinta tacabta qeybaha aan weli la beerin iyo:
   a) Takuleeynta dhismaha iskashatooyinka beeraha iyo isku darka beeraha yar yar si ay u noqdaan ururo wax soo saar ah;
   b) In loo fidiyo taakuleyn dhinaca farsamada iskashatooyinka iyo beeraleyda si loo xoojiyo wax soo saarka;
   c) In lala taliyo iskashatooyinka iyo beeraleyda habka farsamadda iyo qaybka loo diyaar gareeyo dhulka beeridda iyo noocyada dalagga ku fiican beeriska, habka loo daaweeyo abuurka iyo qaabka keydinta dalagga waqtiyada kala duwan, habka loo aruuriyo dalagga iyo diyaarinta kadib markii la goosto dalagga;
   d) Takuleeynta iskashatooyinka iyo beeraleyda si loo helo amaahda loo baahda iibsashada abuurka, bacriminta, qalabka beeraha, alaadaha kimikada iyo kuwa kirada iyo gadiidka.

B) Takuleeynta habka loo galo heshiisyada iskaashatooyinka beeraha iyo beeraleyda sida loo helo adeegyada ku qoran faqradda sare ku xusan iyo iibista dalagga iyo keydinta iyo iibista isla dalagaasi suuqyada kale ee Wakaaladda;

C) Isku xirka Adeegaa Baarista Beeraha iyo faafinta natiijooyinka cilmi baarista ee iskashatooyinka iyo beeraleyda;

D) Dhiiri gelinta wax soo saarka beeraha, iyadoo laga iibsanaya dalaga iskashatooyinka iyo beeraleyda iyo helista keydiinta iyo dib u iibiinta;
E) Tababaradda shaqaalaha xirfadleyda iyo kan maamulka ee iskashatooyinka beeraha iyuo shaqaalaha u xilsaaran shaqooyinka beeraha;
F) Isticmaalka qaababka loo baahan yahay si loo horumariyo adeegyada wadarta ah ee goobaha gudaha dalka iyo dhisidda hey'addo ku habbon.

**Qod. 3**
**Awoodaha Wakaalada**

Waxaa loo hibeyey Wakaaladda awood kasto ee ku xeendaban sharcigaan oo fursad u siin kara si ay u gudato howlaha loo xilsaaray.

**Qod. 4**
**Xuquuqdka Wakaaladda**

Wakaaladu waxay yeelaneysa xuquuq u gaar ah markii loo baahdo si ay u fuliso adegyada loo idday.

**Qod. 5**
**Nooca Wakaaladda**

Wakaaladu ma ahan mid macaash raadineysa kadib markii laga reebo in ay keydin doonto lacag dhigaal ah, waxaa laga rabaa in ay isla sinto wixii kharaj iyo daqliga soo gala.

## Cutubka 2aad
Qaab Dhismeedka

### Qaybta 1aad
Xubnaha Wakaaladda

**Qod. 6**
**Xubnaha Wakaaladda**

Waxaa ka mid ah xubnaha Wakaaladda:

a) Guddomiyaha Wakaaladda;
b) Guddiga Maamulka oo ka kooabn Guddomiyaha Wakaaladda iyo 8 La-taliyeyaal oo 2 ka mid ah ay soo dirtay Wasaaradda Beeraha iyo Xoolaha, 2 ay ka tirsan yihiin Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha, 4ta kale ay ka socdaan Wasaaradda Qorsheynta, Wasaaradda Maaliyadda, Wasaaradda Howlaha Guud iyo Wasaaradda Isgaarsiinta;
c) La-Taliye la soo igmada iyo Ku-Xigeentka Lataliye;
d) Guddiga Dib-u-eegga oo ka kooban Guddomiye iyo la Kormeereyaal.

**Qod. 7**
**Magaabista Xubnaha Wakaaladda iyo Muddo Xileedka**

1. Xubnaha Guddiga Maamulka, la-taliya la igmada, Ku-xigeenkiisa iyo xubnaha Guddiga di-u-eeggidda waxaa lagu soo agacaabi doonoa xeer ka soo baxday Madaxweynaha Jamhuuriyadda isagoo la tashtay Wasiirka Beeraha, Xoolaha iyo Golaha Wasiiradda;
2. Xillaga ay haydoonaan jagooyinkaasi waa muddo 3 sano oo dib loo cusboney siin karo;
3. Xubnaha Guddiga Maamulka, La-taliyaha la igmaday iyo ku-xigeenkiisa iyo xubnaha Guddiga Dib-ueegidda waxaa laga qaadi kara xilkaasi haddii ay qalad culus ay galaan.

## Qaybta 2aad
Howlaha Wakaaladda

### Qod. 8
### Howlaha Guddomiyaha

1. Guddomiyuhu wuxuu wakiil ka yahay Wakaaladda, wuxuu iskugu waca hoggamiye u yahay shirka Guddiga Maamulka wuxuu soo hor dhigaya arrimaha laga hadili doono;
2. Wuxuu as'uul ka yahay dhowrista nidaaka shirarka Guddiga Maamulka;
3. Haddii uu Guddomiyuhu ka maqan yahay shirka Guddiga, waxaa isla Guddigaasi ay si toos ah ay iska dooran doonan oo hoggamiyaha shirka;
4. Haddii codadka dorashada ay isla eekadaan waxaa mid dheeri ah codka Guddoiyaha.

### Qod. 9
### Howlaha Guddiga Maamulka

1. Jiheynta iyo siyaasadda Wakaaladda waxaa iska in uu dejiyo Guddiga Maamulka;
2. Tirada buuxda "quorum" ee shirarka Guddiga Maamulka waa 5 qofood.

### Qod. 10
### Howlaha La-Taliyaha la Igmaday

1. La-Taliyaha la igmadaywuxuu fulin doona go'anada u Guddiga Maamulku gaaro;
2. Wuxuu kadib markii uu helo amarka Guddiga Maamulka uu heshiis la geli gara iskashatooyin iyo beeraleyda kale;
3. Si uu fuliyo howlaha ku qoran faqradah 1 iyo 2 ee sare ku xusan wuxuu la xiriiri cid kasta oo xirfad iyo aqoon ee ka tirsan Dowladda;
4. Wuxuu mas'uul ka yahay qorallada caadi ah ee Wakaaladda. Wuxuu mas'uul ka yahay shaqaalaha Wakaaladda kuwaas oo si toos loo qoray amase laga soo wareejiyey hey'adaha kale ee dowladda.

   Kadib markii uu helo oggolanshaha Guddomiya, wuxuu ruqseyn karo shaqaalaha sida tooska loo qortay, ama wuxuu ku fulinayo dacwooyinka iyadoo taasi ay khuseynin shaqaalaha laga soo wareejiyey hey'adaha kale ee dowladda. Kuwaasi waxaa khuseeya amarrada dawcwo qaadista ku qoran sharcy lamba. 7 ee 15 Maarso 1965 iyo isbeddelladi lagu sameeyey Xeerka Shaqaalaha Madaniga ee Dowladda;
5. Wuxuu mas'uul ka yahay dhigaalka Wakaaladda iyo xisaabadka qarajyada;
6. Wuxuu amar u leeyahay in uu ogaado kharajyada caadi ah ilaa iyo Sh. So. 2,500 ee hal qoraal lagu soo saari karo. Kharaj ilaa Sh. So 5,000 ee hal qoraal ah oo uu suubiyey La-taliyaha la igmada oo kashanaaya Guddomiya Guddiga Maaulka. Kharajka ka koreeya xadkaan waa in ay fassaxaan Guddiga Maamulka;
7. Wuxuu ka qeyb gali doona fadhiyada Guddiga Maamulka wuxuuna ke;ydin doona qoraallada rasmiga ah.

### Qod. 11
### Howlaha Ku-Xigeenka La-Taliyaha la Igmaday

Ku-xigeenka La-Taliyaha la igmaday wuxuu takuleya La-taliyaha la igmaday si uu fuliyo howlihiisa wuxuubeddeli doona markii uu shirarka ka maqan yahay.

**Qod. 12**
**Howlaha Guddiga Dib-u-eegidda**

Guddiga dib-u-eegidda wuxuu leeyahay awoodda kormeerka xisaabta iyo khrajajka Wakaaladda.

**Qaybta 3aad**
Shaqaalaha Wakaaladda

**Qod. 13**
**Shaqaalaha Wakaaladda**

Shaqaalaha maamulka iyo kuwa farsamada ee Wakaaladdu u baahan tahay waxaa laga soo wareejiyey Wasaaradda Beeraha iyo Xoolaha.Shaqaalaha kale ee loo baahdo waxaa si toos ah loo qoran doona, kuwaas oo heshiska shaqo ay xeerin doono Guddiga Maamulka.

**Qaybta 4aad**
Kala soo Wareegidda Adeega Horumarinta Bulshada ee Wasaaradda Beeraha iyo Xoolaha

**Qod. 14**
**Adeega Horumarinta Bulshada**

1. Adeega Horumarinta Bulshada ee Wasaarada Arrimaha Gudaha waxaa lagu wareejiyey Wasaaradda Beeraha iyo Xoolaha;
2. Shaqaalaha Adeega Horumarinta Bulshada ee faqradda sare waxaa lagu fujiyey Wakaaladda Horumarinta Beeraha.

**Qaybta 5aad**
Mas'uuliyadda Xubnaha Guddiga Maamulka iyo Shaqaalaha

**Qod.15**
**Mas'iuliyada Xubnaha ee Guddiga Maamulka iyo Shaqaalaha**

Xubnaha Guddiga Maamulka iyo shaqaalaha Wakaaladda iyagoo wato howlaha ku carifan sharcigaan iyo xeerarka lagu maamulo Wakaaladda waxaa mas'uliydda xafiiska sida ku cad qodobka 5 ee Sharciga lamba. 7 ee 15 Maarso 1962 ee Xeerka Shaqaalaha Madaniga ee Dowladda.

**Qaybta 6aad**
Xil Hayaha Gaarka ah iyo kala Diraha Wakaaladda

**Qod.16**
**Xil Hayaha Gaarka iyo Diraha Wakaaladda**

1. Haddii loo baahdo waxaa:
   a) Maamulka Wakaaladda waxaa si ku meel gaar loogu dhiibi doona kala diraha gaarka ah oo yeelanaya awooda Guddomiyaha Wakaaladda, Guddiga Maamulka iyo midka La-Taliyaha la igmaday aa;
   b) Wakaaladdu waxaa ay noqon doonta mid la baa'bin doono sidas awgeedna waxay hoos tegi doonta awooda kala diraha gaarka ah.
2. Amarrada ku xusan faqradda sare waxaa lagu hirgelin doona Xeer Madaxweynaha Jamhuuriyadda isagoo la kaashanaya Wasiirka Beeraha iyo Xoolaha, lana tixgeliyey aragtida Golaha Wasiiradaha.

## Cutubka 3aad
Maaliyadda, Misaaniyadda, Xisaabaadka oyo Kormeerka

### Qod. 17
### Hantida Wakaaladda

Hantida Wakaaladda wuxuu ka kooban yahay:

a) Dhigaal as aasi ah ee dhan Sh.So 300.000 oo ay dowladdu soo dhigtay;
b) Hibo lacageed oo dheeraad ah ee Dowladda, Hey'adaha Dowliga ah, hey'adaha caalamiga iyo kuwa gaar oo leeyahay;
c) Dhigaal keyd ah oo laga dhigay adeegyada qaarkood;
d) Hibeyn meelo kale ka timaado ha ahaato kuwa dowli ah ama kuwa gaarka ah.

### Qod. 18
### Amaahyada

Wakaaladu kadib markii ay hesho oggolanshaha Wasiirka Beeraha iyo Xoolaha oo horay ula kaashtay Golaha Wasiiradaha, wuxuu qaadan kara amaahda bangiyada dalka gudahiisa ama dibediisa si uu u fuliyo howlaha ku tilmaaman Sharcigaan.

### Qod. 19
### Qorshaha Sanadlaha ah

Ilaa iyo 30 Setebar ee sanad kasta Guddiga Maamulka wuxuu dejin doona qorsho guud ee howlaha Wakaaladda u yaala sanadka soo socda, isagoo tilmaami doono kharajka hor dhac ah iyo qaabka loo wadi lahaa, iyadoo la hor geyn doono si loo oggolado Golaha Wasiiradaha loona dhex mari doono Wasaaradda Beeraha iyo Xoolaha. Nuqul qorshahaasi sanadlaha ah waxaa loo diri doona Wasaaradda Maaliyadda.

### Qod. 20
### Misaaniyadda Sanadlaha ah

1. Misaaniyadda waxaa lagu xisaabiya sanad qoraaxeeyda;
2. Misaaniyad kasto La-taliya la igmaday wuxuu qorsheynaya misaaniyada loo qondeeyey Wakaalada wuxuu horgeynaya Guddiiga Maamulka ka hor 31 Maarso ee sanadka soo socda. Isla bisha ku xigta, Guddiga Maamulku waa in uu soo saaraa go'aan kama dambeys ah ee misaaniyada sanadlaha ah wuxuuna hordhigi doona Guddiga dib-u-eeggida iyadoo uu ku lifaaqi doono warbixin;
3. Guddiga dib-u-eeggidda, bil gudaheeda kadib markii uu guddomay misaaniyadda sida ku xusan faqradda sare wuxuu u gudbin doona Golaha Wasiiradaha;
4. Guddiga Kormeerka ee qodob la soo dhafay ku xusan, kadib markii ay dhegeysatay Xisaabiyaha Guud, waxay ku dhaqaaqi doonta oggolanshada Misaaniyadda waxayna ku soo daabici doonta Faafinta Rasmiga iyadoo kharajku ay Wakaaladdu bixin doonto.

### Qod. 21
### Guddiga Kormeerka

Kormeerka Wakaaladda waxaa fulin doono Guddi ka kooban Wasiirka Beeraha iyo Xoolaha hoggaminayo, iyo Wasiiradaha Qorsheynta, Maaliyada iyo 3 sarkaal ama khabiiro laga soo xulay Wasaaradahaasi.

**Cutubka 4aad**
Amarrada Guunaanadka ah

**Qod. 22**
**Sharciga**

1. Sharciga kowaad ee Wakaaladda waxaa lagu ansixieye Dekreetada Madaxweynaha Jamhuuriyda iyadoo lala tashtay Wasiirka Beeraha iyadoo lala tashtay Golaha Wasiirada;
2. Kadib markii codsi ugaga yimaado Golaha Maamulka waxaa isla qabkii loo suubiyey sharcigaana ayaa wax looga beddeley.

**Qod. 23**
**Xeerarka Habeynta**

Iyadoo la tixgelinayo sharciga iyo qab sharciga lagu dhisay, Guddiga Maamulka wuxuu soo saari kara nidam xeeriyo arrimaha gudaha ee howlahiisa.

**Qod. 24**
**Hirgelinta Sharciga**

Sharcigaan wuxuu hirgeli doonaa maalinta ku xigta markii lagu soo daabaco, waxaana la horgeyn doona Golaha Qaranka si sharci loogu beddelo sharci sida ku qoran qod. 63 ee Dasturka.

Muqdisho, 16 Febaraayo 1966.

**Aden Abdulle Osman**

Rai'sul Wasaaraha
**Abdirizak Haji Hussein**

Wasiirka Beeraha iyo Xoolaha ku meel gaar
**Schek Abdulle Mohamud**